

Somaliska/Soomaali

Sfi – Barashada swidishka ee dadka waaweyn

Sfi-gu, waa assaaska barashada luqadda swidishka, looguna talagalay dadka aysan ahayn swidishku luqadooda hooyo.

Waxaa jira koorsooyin kala duwan oo ku salaysan, haday noqonlahayd, xawliga waxbarashada amaba heerka luqadu ledahayba. Heerka koorsada qofku bilaabay waxaa isla wada go'aaminaya shaqaalaha waxbarashada dadka waaweyn. Waxaa kale oo laga shidaal qaadanayaa hadba heerka qofku uu ka joogo haday noqon lahayd waxbarashada ama khibrada uu leeyahayba, si loo gaaro halka qofku hiigsanayo.

Haddaba yaa xaq u leh inuu dhigto?

Waxaa xaq u leh qofkii ka diiwaan gashan degmada Göteborg oo aan horey u dhigan luqadda, waxuuna ka dhiganayaa xarunta waxbarashada dadka waaweyn, laga bilaabo 1-da bisha luulyo isla sanadka qofku buuxinayo 20 sanno.

Ma kharash baad bixinaysaa?

Waxbarashadu waa lacag la'aan. Wax taakulayn dhaqaale ah oo lagugu siinayaana ma jiraan muddada aad luqadda baranaysa. Laakiin dadka soo galootiga cusub waxay ku dhigan karaan dhaqaalaha la siiyo qoxootiga cusub. Haddii uu dhaqaale kaa soo galo, tusaale ahaan xafiiska shaqada ama aad qaadato dhaqaalaha khasnadda ururka shaqalaha ee la siiyo qofka shaqa la'aanta ah ee horey u soo shaqeyn jirey. Hadaba waxaa waajib kugu ah inaad la socodsiiiso gacanyarahaaga xafiiska shaqada, ka hor intaadan bilaabin barashada afka.

Sida loo codsado

Waxaad iska soo qoraysaa sfi-ga, adoo booqanaya shakhsiiyan Xarunta waxbarashada dadka waaweyn kuna taala cinwaakan, Rosenlundsgatan 8. Booqashadaada ugu horeysana waa inaad wadataa warqadda sugnaanta (personbevis) ee aad ka soo qaadanaysa xafiiska canshuuraha iyo diiwaangelinta (skattemyndigheten) iyo kaarka aqoonsiga (legitimation) ama baasaboort.

Waqtiyadda ay furan tahay, xarunta waxbarashadu.

Isniin	10:00 – 16:00
Talaado	10:00 – 18:30
Arbaco	10:00 – 16:00
Khumiis	10:00 – 16:00

Waqtiyada taleefoonka

Isniin – Khumiis 10:00 – 11:30
Taleefoon: 031 – 368 30 00